

Somaliska

## **Qorshe ka dhan ah takooridda iyo hab dhaqanka meel ka dhaca ah**

Kambaska Nyköping wuu iska fageynayaa qaab kasta oo takoorid iyo hab dhaqan meel ka dhaca ah. Dhammaan dadka iskoolka dhigto waxay xaq u leeyihiin in qof-qof ahaan loola dhaqmo iyadoo laga duulayo hadba duruufaha iyo baahida qof walba u gaarka ah. Haddii xaalado takoorid ah ay soo baxaan ama si meel ka dhac ah qof loola dhaqmo iskoolku mar walba taas wuu ka jawaabayaa.

Waxbarashada dadka waaweyn waa in ay mar walba ahaato mid leesugu aamin qabo iyo goob aamin ah halkaas oo ardayda iyo shaqaaluhu ay ku faraxsanyihiin, horuumar ku sameynayaan, ammaanna ku dareemayaan.

Cidna, haddey noqon lahayd ardayda ama shaqaalaha, abidkeed looguma geysan karo takoorid ama hab dhaqan meel ka dhac ah, cid walbana waa in ay ogaato cidda ay la xiriiri karto haddii saas oo ay tahay ay waxaasi dhacaan.

Dhammaan dadka wax ku baranaya ama ka shaqeynaya Kambaska Nyköping waa in ay ogaadaan, helina karaan qorshaha jira, waana in ay ogaadaan sida loo maareynayo arrimaha looga shakisanyahay takooridda iyo hab dhaqanka meel ka dhaca ah.

Qorshayaasha ku aaddan sida wax loo qabanayo oo dhan waxaa laga heli karaa barta waxbarashada Moodle ee Kambaska Nyköping iyo macluumaadka Kambaska Nyköping.

Haddii aad qabtid wax aragti ah oo qorshaha ku aaddan ama aad dareemeysid amaan darro waxaad la xiriiri kartaa macallinkaaga ama maamulahaaga.

Campus Nyköping

Rosmari Gärdin  
Madaxa waxbarashada